

Caawimo loogu talo galay dadka ku hadla Soomaaliga



Waanu ku caawin karaa haddii luuqaddaada koowaan tahay Soomaali

Haddii aadan Ingiriisida ugu hadlin si luuqaddaada kowaad ah, Homes for Islington waxay kaa caawin karaan inaad hesho adeegyadayada, anagoo kuu caawinaya dariiqyada soo socda:



Waxaanu qorshayn karaa turjumaan ku hadla luuqaddaada, oo kugula hadla telefoonka. Wadahadal telefoon oo 'saddex-geesood' ah oo turjumaan ka qaybqaato ayaa lagu qorshayn karaan dhawr daqiiqo gudahood. Waxaad u baahanaysaa inaad noo sheegto luuqadda aad ku hadasho (iyo lambarka telefoonkaaga haddii aad na soo wacayso).



Haddii aad xafiiska timaada, waxaa laga yaabaa in la heli karo xubin shaqaalaha ah oo luuqaddaada ku hadla, ama waxaanu telefoon u diri karaa turjumaan inta aad nala joogto. Ama haddii aad balan xafiiska ama guriga ku leedahay, waxaanu qorshayn karaa turjumaan xirfadle ah oo weji-ka-weji ah. Waxaad u baahan tahay inaad noo sheegto inaad adeegan u baahan tahay.



Haddii aad hashid/haysid warqad, warqad-wareed yar ama dukumeenti ku oqran Ingiriisi oo ka timi Homes for Islington, waxaa luuqaddaada kuugu sharxi kara turjumaan. Waxaanu kaloo haddaba haynaa dukumeentiyo muhiim ah oo luuqaddo kale lagu turjumay, ama waanu ka fekeraynaa inaanu sidaa samayno haddii aad na weydiisato.



Homes for Islington waxay kaloo kaa caawin karaan inaad horumar ku samayso xirfadaada Ingiriisida. Waxaanu kuu sheegi karaa meelaha agagaarkaaga ah ee aad ka heli karto koorsooyin luuqadda ingiriisida ah (kuwaas oo ay badanaaba si lacag la'aan ah u bixiyaan kuliyo iyo Islington Borough Council). Waxaanu kaloo ka fekeraynaa inaanu maalgelino koorsooyin luuqadda Ingiriisida ah oo agagaarkan laga bixiyo, taaso oo qayn ka ah xeeladayada 'Hawlgalada Bulshada' ('Community Engagement').



Waxaad calaamaddan ku arki doontaa qaar badan oo dukumeentiyo Homes for Islington ah. Tani waa in lagu xasuusiyo Adeegyada turjumaada afcelinta iyo turjumaada qoraalka ah ee la heli karo haddii aadan Ingiriisida ugu hadlin si luuqaddaada koowaad ah.